Ujeedo: Cabsi gelin: Isku xoog sheegashada ardayda Xilliga ay Joogaan Dugsiga.

Maamulka waxbarashada ee dugsiyadu waxa ay ballan qaadayaan in ay abuuraan deegaan waxbarasho oo aan laheyn midab kala sooc iyo sadbursi ama wax argagax ku abuura ardayda, taas oo ku saleysan mabda'a iney xaq u leeyihiin in loola dhaqmo si sharaf iyo ixtiraam ku jiro. In ardaydu is handado waa arrin ka reeban degaanka dugsiga , dugsiga dhexdiisa iyo basaska dugsiga, xafladaha dugsigu qaban qaabiyo ha ahaato gudaha ama meel ka baxsan dugsiga. Waxaa la ogaaday in handadaadu wiiqdo awooda ardaygu u yeelan lahaa waxbarashada, sidaa si lamid ahna dugsiyada ay ku adkaaneyso sidii ay wax ugu bari lahaayeen ardaydooda meel ay ku dareemi karaan nabadgalyo. Waxaa lagu dari doonaa xeerarka u degsan maamulka waxbarashada dugsiyada sharci ogolaanaya in la faragaliyo lana mamnuuco handadaada iyo wixii la xiriira, sharcigaas oo saameyn doona dhamaan fasalada kala duwan ee dugsiyada. Ardaygii ku xadgudba sharcigaas handadaada waxaa lagu ciqaabi doonaa ciqaab ay dajiyeen maamulka waxbarashada degmada (ama xeelado lagu faragalinaayo handaada oo ay dajiyeen maamulku) taasoo waafaqsan sharciga, xeerka degmada iyo maalmulkooda, iyo xeerarka u degsan maamulka waxbarashada dugsiyada.

Qeexid/ Tusaale ku saabsan dhaqamada la mamnuucay.

Sababta loo soo saaray sharcigaan, ereyga "cabsi gelin" markey ilmuhu macneynayaan waa: falal xunxun oo la sameeyo oo si isdaba joog ah isla markaana socda muddo dheer. Waana awood sheegasho weyn oo qof ama kooxi ku sameyso kuwo ka awood yar. Waxaa handadaadu u dhacdaa saddex siyaabood.

1) Muuqaal jirka kore ah (ay ka mid yihiin arimahan balse aan intaas ku ekeyn: garaacid, laadid, candhuuf ku tufid, kala tuurid, iyo in alaab laga xoogo)
2) Af ka hadal (ay ka mid yihiin arimahan balse aanan intaas ku ekeyn: foorjeyn, caay aad u xun, magacyo foolxun oo loogu yeero qofka, iyo in loo dhaarto).
3) Maskaxiyan (ayna ka mid yihiin arimahan balse aanan intaas ku ekeyn: in xanta la faafiyo, in la khayaamo xiriirada nololeed ee uu qofku leeyahay, amaba laga takooro bulshada qofkaas, in la baado amaba la argagixiyo).

Waxa kale oo degmadu mamnuucday " handadaada la isugu gudbiyo kumbiyuutarka" taas oo lagu tilmaamo iney tahay "Cabsi gelinta aan la taabin karin", waxaana ka mid ah (fariimaha la isu diro, adeegsiga barta internetka iyo qolalka lagu haasaaawo (sheekeysto). Hadii

loo arko in arimahaasi ay carqaladeynayaan dugsiga, ama ay xadgudub ku yihiin caafimaadka guud, nabadgeylada ardayda ama shaqaalaha dugsiga.

Si kastoo aay ahaato falalkaas xunxun aan kor kusoo sheegney waxa aay noqon karaan handadaad (hadii kale waxa aay noqonayaan danbiyo ka culculus) marka loo eego waxyeelada ay geysaneyso falalkaas xunxun ee la sameeyey ama loola dan lahaa in la sameeyo.

Sida loo gudbiyo dacwadaha: Xeerka guud.

1) Arday kasta oo aaminsan in la handadey iyo qofkii og ama ka marag kacaya handadaadaba waa in aay u soo gudbiyaan dacwada shaqaalaha ama maamulka dugsiga.

2) Shaqaalaha/ Maamulaha dugsiga ee dacwadu soo gaartay (ama shaqaalaha/maamulaha marag kacaya handadaad) waa iney baaraan ayana ka qaadaan talaabo ku haboon, talaabadaas oo la raacinayo in la wargeliyo dacwada madaxda sare ee degmada u qaabilsan dacwadaha la xiriira handadaada. *Baaritaanada la xiriira handaddada waa in loo tixraacaa wadada loo maro danbiga gardareysiga ama daandaansiga ee u dagsan dugsiyada degmada taasoo ay ku jirto diiwaangalinta dacwoooyinka "rasmiga"iyo kuwaan "rasmiga aheyn".*

3) Dacwooyinka la xiriira hadey ahaan lahaayeen kuwo afka la iska yiri ama qoraal ah, kuwa rasmi ah iyo kuwa aanan rasmiga aheynba waxaa loo baarayaa si rasmi ah, oo degdeg ah, oo aanan eex ku jirin oo waafaqsan sharciga/xeerka u dagsan degmada, Xeer maaumulka ee sharciyada habdhaqanka maamulka waxbarashada dugsiyada .

4) Dacwooyinka la xiriira falalka handadaada waxaa loola dhaqmayaa si qarsoodi ah, hase ahaatee waxaa dhici karta iney lagama maarmaan noqoto in la soo bandhigo si loo baaro dacwada isla markaana si loo ogeysiiyo madaxda ciidamada nabadgalyada . Soo bandhigidda dacwada waxay noqoneysaa mid ku saleysan "baahi loo qabo in la ogaado". *Hadii maamulka dugsigu ay soo gaaarto dacwad ama warbixin ku saabsan handadaad oo loo arko iney danbi noqon karto oo keeni karta dagaalo dugsiga gudihiisa ama banaankiisa ka dhaca waa in si deg deg ah loola socodsiiyo sharci yaqaanada.*

5) Markii la baaraayo danbiga handadaada Maamulku waa inuu tixraacaa sharciga sida ugu haboon (Sida xeerarka u dagsan danbiga gardaraysiga iyo u hanjabida) sharcigaas oo la waafajinaayo midka u degsan *Xeerarka u degsan maamulka waxbarashada* .

6) Maamulaha/qofka u xilsaaran danbiga handadaadaba waa in si deg deg ah loo ogeysiiyo dacwada iyo hadba meesha baaritaanku maraayo.

7) Waa in la diiwaan galiyaa baaritaanka eedeymaha ku saabsan handadaada dugsiga dhexdiisa ah si degmadu xoog u saarto sidii loo yareyn lahaa danbiyada noocaas ah.

8) Waalidka ardayda la handaday iyo ardayga gudbiya dacwad ku saabsan handadaada iyo waalidka ilmahooda lagu eedeeyey danbigaasba waa in la la socodsiiyaa maamulka dugsiga si sharciga waafaqsan. Haddii ardayga la handaday uu naafo yahay ama loo arko inuusan dhameyn ciqaabtu way badnaan doontaa iyadoo la raacaayo sharciyada u degsan ee dowlada dhexe iyo gobolka.

Mamnuucidda Aarsashada Maamulka waxbarashada ee degmadu waxa uu mamnuucay ka aarsiga qofkii dacwo sameeya, qofkii la handaday, markhaatiyaasha iyo dadka ka qeyb qaata barista danbiyada la xiriira handadaada. Waa in la dabagalaa korna lagala socdaa qofka lagu soo eedeeyey inuu wax handaday iyo qofka dacwada sameeyey si looga hortago iney dib u bilowdaan falalkaas iyo in la difaaco dadka baaraya danbiyadaan si aanan looga aargudsan.

In ogaan dacwo beena loo sameeyo

Waa la ciqaabi doonaa qof kasta oo si ogaan ah u sameeya dacwad been abuur ah oo ku saabsan handadaad.

Masuuliyada Degmada/Tababar

Maamulayaasha dugsiyada iyo madaxda barnaamijkanba waxaa xil weyn ka saaran yahay iney la socodsiiyaan ardayda iyo shaqaalaha dugsiga sharciiyada degmada ee ku wajahan mamnuucista handadaada iyo wixii la xiriira.

Shaqsi kasta darajaduu doona ha ahadee waxaa xil ka saaran yahay inuu ka hortago uuna la socodsiiyo maamulka sida ugu dhaqsaha badan falalka handadaada la xiriira. Intaa waxaa dheer in shaqaalaha la tababaro si loo faafiyo dhibaatada handadaadu leedahay iyo si loo fahamsiiyo astaamaha handaada ee ay ardaydu dhexdooda isku sameeyaan.

Sida Maamulku dajiyey oo ah in laga hortago lana farogaliyo falalka handadaada la xiriira waxaa dheer in dhismaha dugsiga iyo fasalada laga sameeyo dhaqdhaqaaqyo ku haboon hadba fasalada kala duwan ee dugsiga oo ku wajahan dhibaatada handadaadu leedahay. Shaqaale qibrad u leh arintan ayaa dhex dhexaadin doona waalidka ardayga la handaday iyo ardayga wax handadayba si loo ciribtiro dhibaatooyinka keeni kara falalka noocaas oo kale ah.

Xeelado lagu yareyn karo handadaada.

Talaabooyinka hoos ku xusan waa xeelado lagu faragalinaayo handadaada oo ay ansixiyeen *Xafiiska Cadaalada ee qaabilsan Dhalinyarada iyo ka hortaga danbiyada fudud:*

1) In la baahiyo sharciyada lagaga hortagayo handadaada iyadoo lagu dhajinayo qoraalka sharcigaas dhamaan dugsiyada degmada oona la raaciyo ciqaabta uu muteysanayo qofkii sameeya danbigaas (fiiro gaara: ciqaabta qofka wax handado waa in laga soo xigtaa Sharciga Degmada.

2) In la sameeyo arday iyo dad waaweyn oo la taliya ardayda la handaday iyo kuwa wax handadayba.

3) In ardayda la iskugu xiro koox koox si ay isaga caawiyaan jadwalka iskoolka iyo qorsheyaasha maalin laha ah.

4) In dugsiga laga sameeyo xarun ay waalidiintu leeyihiin oo loogu dhiirigalinaayo iney qeyb weyn ka qaataan waxbarasha ilmohooda ayna taageeraan mashruucyada dugsiga.

5) In waxbarashada dadka waa weyn lagu daro xirfado ku wajahan sida caruurta loola dhaqmo iyo in maadooyinka ardaydu qaataan lagu daro maareynta carada iyo tababaro adag oo la xiriira handadaada.

6) In lagu baahiyo sharciyada degmada macalimiinta, ardayda, waalidiinta oo loogu sheego iney qasab tahay in la raaco sharcigaas.

7) In la sharxo oo la buun buuniyo akhlaaqda wanaagsan si loo cambaareeyo falalka xun xun.

8) In ardayda la handado la iskugu xiro koox koox isku da'ah si ay isku taageeraan

9) In la abuuro arday isku da' ah oo dhex dhexaadiyeyaal ah iyo maxkamad dhalinyaro oo lagu tababaro ardayda sidii ay u xalin lahaayeen dhibaatada dhexdooda.

10) In la sameeyo manhaj lagu xaliyo iska hor imaadyaada ardayda dhexdooda ah oo ku haboon da' da ardayda iyo heerkooda waxbarasho.

11) In la kordhiyo tirada shaqaalaha dugsiyada indhahana ay ku hayaan marinada fasalada u dhexeeya, maqaayada gudeheeda, goobaha ardaydu ay ku cayaaraan, meelaha lagu tababaro ardayda, meesha qasnadaha ardaydu ku yaalaan, basaska dugsiyada, dhacdooyinka uu qaban qaabiyo dugsiga hadii ay ahaan laheyd gudaha ama banaanka dugsiyada si loo yareeyo fursadna loogu diido falalka la xiriira handadaada.

12) La taliyeyaasha ardayda ee dugsiga dhexdiisa ah iyo dadka xirfadda u leh caafimaadka maskaxda waa iney ka howlgalaan meelaha looga baahan yahay.

13) In jaaliyada dadka ka tirsan ay ka qeyb qaataan falalka ay degmadu uga hortageyso handadaada (sida in la qabto kulamo ay ka soo qeybgalaan maamulka jaaliyada si looga wada tashado barnaamijka dugsiyada uu u dajiyey ka hortagista handadaada iyo in warfaafinta lagu daro arintaan si loo baahiyo barnaamijyada ay degmadu u sameysan yihiin ka hortaga iyo carqaladeynta handadka, iyo in jaaliyada dadka ka tirsan ay ka qeyb qaataan dadaalka beesha iskoolka ay ugu jirto ka hortaga handadka).

Faafinta/daabacaada qoraalka degmadu ku mamnuuceyso arrimaha la xiriira handadka oo ay soo saaraan ardayda

Sharciga degmada ee lagu mamnuucaayo handadaadda iyo waxa la xiriira oo ay soo saareen ardayda waxaa lagu daabici doonaa meelaha ku haboon, sida buug yaraha macalimiinta iyo ardayda, ama jadwalka taariikhda ee dugsiga leeyahay. Waxa aad codsan kartaa nuqul ka mid ah buug yaraha.Intaa waxaa dheer sharciga degmada ayaa lagu dari doonaa mamnuucista handadaada ardayda dhexdeeda ah iyo ciqaabta qofkii lagu cadeeyo danbigaas taas oo lagu saleynaayo heerarka kala duwan iyo fasalada ardadu dhigato.

FIIRO GAAR AH: Tixraac sharciyada # 3410R

3420R

3420R.I

7317R